Waxaan ka taageernaa dadka cusub in ay awood u helaan:

- Daryeelka caafimaadka ee NB, barnaamijka Caafimaadka Federaalka, iyo xuquuqda bukaha
- Gargaarka Caafimaadka ee deg dega ah
- Xarunta Caafimaadka Bulshada ee Gudaha magaalada Firidirikton
- Adeegyada Isbitaalada
- Adeegyada Caafimaadka Bulshada ee Niyuu Baraaniswiik
- Adeegyada caafimaadka maskaxda iyo dadka ku xiran balwada
- Dhaqaatiirta Ilkaha iyo Indhaha
- Adeegyada takhakhuska bulshada iyo gobolka dhexdiisa
- Nolosha Canada, barnaamijyada waalidiinta, caafimaadka maskaxda iyo bed qabka
- daryeelka caafimaadka, adeegyada waxbarasho ee dowliga ah iwm

Xiriirada Bulshada

Saaxiibada ugu Horeeya ee Firidirikton waa mutadawiciin lawadaaga waqtigooda si ay uga caawiyaan dadka cusub degista Firidirikton. Waxey dadka cusub baraan hawlo iyo dhacdooyin ku saabsan bulshadooda cusub.

Barnaamijyada Kooxaha UDHBF

Ka xaadirista dhaqdhaqaaqyada iyo barnaamijyada kala duwan waxey dadka cusub siisaa fursad ay kaga qayb qaataan bulshada, kor ugu qaadaan xiriirka ayna ku sameystaan saaxiibo cusub. Ku biirista kooxaha Muhaajiriinta Haweenka, Nimanka, Waalidiinta, Waayeelka, Gabdhaha, iyo Wiilasha waxay siisaa dadka cusub fursad ay ku damaashaadaan, qibradahoodana ula wadaagaan dadka cusub ee kale xiligan ay degayaan wadankooda cusub.

Soo dhowow

Waxaan kaa caawineynaa in aad halkaan degto. Waxaanu ku siineynaa adeegyada aad u baahan tahay si ay kaaga caawiso in aad billabatid noloshaada cusub ee Canada.

Ururka Dhaqamada Badanee Firidirikton Inc.
28 Saunders Street
Firidirikton, Niyuu baraaniswiik
Canada E3B 1N1

Email: mcaf@mcaf.nb.ca
Tell (506) 454-8292

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada
Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada
Canada

Barnaamijka Saacidaada Dib- u dejinta

www.mcaf.nb.ca

Waa maxay Barnaamijka Saacidaada Dib u Dejinta ?

Barnaamijka Saacidaada Dib- u dejinta shaqaaluhu waxey soo dhoweeyaan Qaxootiyada ay Saacidey Dowlada laga soo billaabo imaanshahooda Garoonka diyaaradaha ee Firidirikton. Shaqaalaha BSD waxey ka saacidaan qaxoontiga cusub baahiyaha deg dega ah, kuwa muddada kooban sida turjumaida, gaadiidka iyo dejinta guri ku meel gaar ah.

Maxey qabtaan shaqaalaha BSD ?

Gudaha 4-6 usbuuc ee imaanshaha Canada, waxay shaqaalaha BSD ka taageeraan qaxoontiga cusub ee dowladu ka masuulka tahay:

- In ay helaan guryo rasmi ah, qalabeynta guriga, iyo adeegyada caafimaadka;
- In ay helaan sharaxaad ku saabsan:
  - Barnaamijyada federaalka ee waajibka ah iyo kuwa gobolka (Nambarka Caymiska Bulshada, Barnaamijka Caafimaadka Federaalka, Kaadhka Caafimaadka ee Niyuu Baraniswiik, Lacagta Dareelka Caruurta ee Canada, saacidaada dhaqaale)
  - Xirfadaha nolosha ee Canada, dhaqanka iyo bulshada
  - Qaabka maamulka lacagta, sanduuqa baanka iyo dejinta qarashka Guriyeynta
  - Waxbarashada bulshada
  - Gaadiidka dadweynaha iyo sharaxaad deriska
  - Adeegyada deg dega ah 911
  - Habka daryeelka caafimaadka Canada
    - Xaquuqaha iyo masuuliyadaha
    - Barnaamijyada Caruurta iyo dhallinyarada
    - Taageerada shaqo raadinta

Ururka Dhaqamada Badan ee Firidirikton Inc. (UDHBF) wuxuu ku soo dhoweeyaa Qoxootiyada ay Saacidey Dowlada Firidirikton ayadoo loo marayo **Barnaamijka Saacidaada Dib- u dejinta.**

Taageerada dhaqaale ee QSD ee Cusub

Dowlada Canada, ayadoo u mareyso, **Barnaamijka Saacidaada Dib- u dejinta** (BSD), waxey siisaa saacidaad dhaqaale QSD, si ay ugu qabsadaan baahiyadooda aas aasiga ah. Cadadka saacidaada wey kala duwan tahay, waxaney ku xidhantahey tirada iyo da'da xubnaha qoysaska. Qoysaska QSD waxey helaan taageero dhaqaalei ugu badnaan hal sano, ama inta ay dhaqaalo ahaan isugu filnaanayaan.

Barashada Ingiriiska ama Faransiiska

Gudaha Niyuu Baraniswiik, waxaan ku hadalnaa Ingiriis, Faransiis ama labadaba. Niyuu Baraniswiik waa gobolka keli ah si sharciyan ah looga hadlo labada luuqadood.

Dadka da'dooda tahay 18 sano iyo inta ka weyn waxaa la qiimeynayaa heerkooda Ingiriisiga, waxaana lagu meeleynayaa fasalada Ingiriisiga ee UDHBF. Inta ay waalidiintu ku jiraan fasalada Ingiriisiga, caruurta (da, doodu tahay 6 billood illaa 5 sano) waxaa lagu soo dhoweynayaa in ay ka soo xaadiraan barnaamijka **Daryeelka Caruurta Cusub** (DCC).

Shaqaalaha UDHBF waxey dadka cusub ka taageeraan diiwaan gelilnta luqada faransiiska oo lacag la'aan ah taasoo oo ay bixiso Koleejka Bulshada ee Niyuu Baraaniswiik.

Shaqaalaha BSD waxey ka saacidaan dadka cusub in ay diiwaan geliyaan caruurta Iskuulo. Dadka cusub waxay dooran karaan in ay caruurtooda geeyaan Iskuulada Ingiriisaga ama Faransiiska.

Shaqaalaha dejinta ee la shaqeeya Iskuulada Faransiiska waxa u fududeeyaan qoysaska cusub ka qayb galka bulshada iskuulka iyo barnaamijyada dhalinyarada iyo caruurta ee UDHBF.

Taageerada Daryeelka Caafimaad

Shaqaalaha **Caafimaadka ee Dadka Cusub** waxey fududeynayaan qiimeynta baahiyada daryeelka caafimaadka, sharaxaada iyo u gudbinta adeega daryeelka caafimaadka oo ee ugu haboon ee bulshada dhexdeeda ah taasoo loo qabanayo qof kasta.